Ardayda oo had iyo jeer Badqabta

Su'aalaha Had iyo Jeer la Iswaydiiyo

Iskuulkiinu Nabad Ma Yahay?
Haa. Haddii aan ka cabiro dhanka statistic-ka iskuulka waa meesha ugu amaanka badan waligiis cunug ku noolaan karo. Ameerika waxaa ku nool in ka badan 50 milyan oo caruurta iskuulka dhigata ah. Ixtimaalka ah in cunug iskuulka ku dhinto waa hal mid 2 milyan oo kasta Dugsiyada Dadwaynaha ee Staint Paul (SPPS) waxaa ka go'an inay iskuulada ka dhigaan meel amaan iyo badbaado u leh ilmaha oo ay wax ku bartaan kuna koraan.

Iskuulada oo dhmi ma leeyihiin qorshaha xaaladaha degdega ah?
Haa. Iskuul kastaa wuxuu leeyahay qorshe amaanka iyo badbaadada - oo iskuulkaas loo sameeyey - qorshahaas oo biloowga sanad walba dib loo cusboonaysiiyo. Kulan ay isku soo horfariistaan maamulka iskuulada degmada, shaqaalaha Maamulka Nabadgalyada degmada ayaa waxay sanad walba biloowgiisa isugu yimaadaan kulan lagu eegayo baahida khaaska ah ee dhisma walba.

Iskuulada SPPS Qoryo ma loo ogolyahay?
Maya. Nidaamka Guddoonka waxbarashada ee 903.00 ayaa wuxuu xaaraantinimaynayaa in iskuulada qori loo soo qaato. Waxaa laga yaabaa in saamaxaad la siiyo

- Sarkaalka Nabadgalyada oo shaqada ku jira
- Shaqaalaha Nabadgalyada ee shaqada kaga jira xarunta waxbarashada degmada
- Qof fasax qoraal ah oo rasmi ah ka haysta Gudoomiya Waxbarashada Degmada

Tilaabo sharciga waafaqsan ayaa laga qaadayaa qof kasta oo ku xadgudba nidaamkaan.

Ma la tijaabiyey in loo baahanyahay iyo kale in qalabka biraha lagu baaro la dhigo albaabada hore ee iskuulada laga soo galayo iyo in kale galo?
Qiimaynta baahida amaanka ee dugsiyada SPPS waxaa si joogta ah loo sameeyaa sanad walba. Markii aan eegnay habka wadanka oo dhan looga shaqeeyo iyo mustawaha kambaniyada (industry) isla markaana ayadoo aan si aad isugu dhoow aan iskula shaqaynayno hay'addayada sharci fulinta waxaan tixgalinay qalabka biraha lagu baadho ee gacanta lagu qaato inuu nooga wanaagsanyahay laguna isticmaali karo dhismayaasha iskuulada iyo dhacdooyinka kale ee iskuulada markii loo baahdo.

Albaabada iskuulada dhamaantood marka laga reebo albaabka hore ee wayn maxiranyihiin dibada ma ka xiranyihiin inta iskuulku socdo?
Haa. Arintaani waa mustawaha degmadu ku shaqayso. Si kastaba ha ahaatee, barnaamijyada qaarkood waxaa laga yaabaa inay xaaladu xitaa intaas ka sii adagtahay waxayna ku xirantahay haddba siddii loogu baahdo.

Dadka iskuulka soo booqanaya ma looga baahnayahay inay xirtaan nooc waxyaabaha lagu aqoonsado ah (ID)?
Haa. Haa tan lafteedu waa mustawaha loobaahanyahay iskuulada oo dhan.

Maxaa la samayn karaa si loo wanaajiyo galitaan la'aanta ama kontoroolka iskuulada?
Qiimaynta had iyo jeer si joogto ah ayaa loo sameeyaa. Galitaanka dhismayaasha waxaa jira waxyaabo had iyo jeer lagu kordhiyo sida shaqaalaha, qalabka tiknoolojiyada iyo dadaal loogu jiro miisaaniyaddiisa loogu talagalay in sare loogu qaado.

Maxay tahay sababta aanay albaabadada oo dhan had iyo jeer loo xirayn?
Dugsiyada SPPS waxay doonaysaa inay hab miisaaman u ambaqaado nabad galyada shaqaalahayaga ardaydayada iyo baahida loo qabo soo dhawaynta qoysaska iyo bulshada aan isla shaqayno lagu soo dhaweeyo. Si kastaba ha ahaatee nabadgalyada waxaan had iyo jeerba siinaa ahmiyada ugu wayn.

Albaabada fasaladu ma xirma?
Haa.

Fasalwalba talefoon ma yaalaa?
Haa.

Ma jiraan saraakiisha boliiska ama waardiyaal iskuulada ka shaqaynaya?
Haa. Waxaan leenahay 10 Saint Paul Police School Resource Officers (SROs), oo iskuulada si toos ah ula shaqeeya. Saraakiishaan qaarkood ayaa iskuula khaas ah ku qoran, isla markaana qaarkood ah ciidamo wareega oo diyaar u ah inay gaaraan meeshii degmada looga baahdo. Dugsiyada SPPS waxay kale oo leeyihiin lambar u khaas ah oo uu iskuul kastaa kula soo xiriirikaro kooxaha nabad galyada.

Iskuuladu ma leeyihiin cajlada kaamarada fiidyoowga ee sahanka?
Haa. Cajlada sahanka fiidyowga waxaa lagu isticmaalaa dhoowr meelood oo meel kasta oo ka tirsan Dugsiyada Dadwaynaha ee Sint Paul.

Iskuuladu ma leeyihiin gambaleel laga dhawaajiyo si ay shaqaalaha iyo ardaydu u ogaadaan waxa la samaynkaro haddii qof tuug ah ama caadi u hubaysan oo hub isticmaalaya uu dhismaha soo galo?

Haa. Dhamaan dugsiyada SPPS waxay ugu yaraan shan jeer sanadkii sameeyaan carbis lagu baraktisgaraynayo in haddii loo baahdo amaan ahaan iskuulka albaabada laysugu dhufto. Iskuul kasta waxaa shardi ku ah inuu ugu yaraa shan jeer carbiskaan qabto sanad kasta. Carbis kasta waxaa diyaarinaya oo wakhti u dajinaya maamulka iskuulkaas/maamulaha iskuulka waana la duubayaa waana la warbixin ayaana laga diyaarinayaa, waxaana qiimaynaya shaqaale ka tirsan waaxda Nabadgalyada iyo Maamulka Xaaladaha Degdegga ah ee loo yaqaan Security and Emergency Management (SEM).

Maxaa ardayda dugsiyada hoose la baraa inta lagu jiro carbiska noocaan ah?
Fariinta guud waa in ardaydu sidagan ayagoo aamusan ay u qaataan awaamiirta macalimiintoodu farayaan. Nidaamyadaan waxaa ku jira in fasalka laga dhigo mid amaan ah ama ardaydu ku badbaadi karto iyo in ardayda lageeyo meelaha aan si dhib yar lagu arki karin ee qolka.

Ma jiraan wax adeeg ah oo loo heli karayo caruurta iyo waalidiinta laga yaabo inay u baahdaan kaalmo dheeraad ah haddii ay dhacdaba arin qaracan leh?
Haa. Waxaa jira koox lagu magacaabo Crisis Response Teams oo gaar ah loogu taba baray arimahaas oo 24-ka saac ee maalin walba todobada casho ee asbuuca. Lataliyayaasha iskuulada iyo shaqaalaha bulshada (social workers) ayaa si toos ah ula shaqaynaya cidii u baahata ama sahlaya adeegyada ayadoo la isticmaalayo bulshada ku haboon ee aanu wada shaqayno.

Wakhtiyadaan la joogo iskuulada ma waxaa ka jira toogasho mise waxyaabo ku saabsan baan iska maqalaa?

Dilka lagu dhinto ee iskuulada ka dhacaa waa yaryahay; xaqiiqdii, ixtimaalku wuxuu muujinayaa inay kaaga dhoowdahay in biriqi kugu dhacdo (taas oo ah 1-kii mar 700,00 ee mar)[i]. Kadib markii ay meeshii ugu saraysay gaartay ee sanad dugsiyeedkii 2006-2007, tirada dadka lagu dilay arimo la xiriira iskuulada waxay hoos u dhacday 33 sanadii 2009-2010 – waxayna ahayd tii ugu hoosaysay labaatankii sano ee la soo dhaafay sida ay sheegtay Wasaarada Waxbarashada iyo Barbaarinta ee wadanka Maraykanka.

Xageebaan ka helikaraa macluumaad dheeraad a ku saabsan nabadgalyada iyo badbaadada dugsiyada SPPS?

Waxaad ka eegtaa halkaan: http://safety.spps.org

[i] http://news.nationalgeographic.com/news/2004/06/0623_040623_lightningfacts.html